

## Dulmarka Guud ee Nidaamka Cabashada Bulshada Waxbarashada Gaarka ah (SECC) – ee Ka Dhanka ah OSPI

Qaybta Waxbarashada Gaarka ah ee Xafiiska Kormeeraha Guud ee Waxbarashada (Office of Superintendent of Public Instruction, OSPI) waxay heshaa ashtako beesha waxbarashada gaarka ah oo dhamaystiran oo laga gudbiyay OSPI. **(Maalinta 1aad)**

Qaybta Waxbarashada Gaarka ah ee OSPI waxay la xiriirtaa oo u gudbisaa cabashada Madaxa Sare ee Xuquuqda Sharciga iyo Madaniga (Chief Legal and Civil Rights Officer, CLCRO)

CLCRO waxay dib u eegi doontaa cabashada kuna wareejin doontaa baaraha cabashada (Baaraha) ee ka socda Qaybta Arrimaha Sharciga ee OSPI **laba maalmood oo maalmaha shaqada ah gudahood**. Baaraha waa inuusan lahayn wax dano gaar ah.

Baaraha wuxuu furayaa cabashada wuxuuna warqadda furitaanka iimayl ugu dirayaa qofka cabanaya iyo Qaybta Waxbarashada Gaarka ah ee OSPI, isagoo sheegaya arrinta (arimaha) la baarayo **laba maalmood oo maalmaha shaqada ah gudahood**.

Qaybta Waxbarashada Gaarka ah ee OSPI waxay haysataa **17 maalmood oo isku xiga** si ay uga jawaabto arrinta (arimaha) loo aqoonsaday in la baaro.

Baaraha wuxuu helayaa jawaabta cabashada ee Qaybta Waxbarashada Gaarka ah ee OSPI. Baaraha wuxuu qofka cabanaya iimayl ugu dirayaa koobiga jawaabta cabashada **hal maalin oo maalmaha shaqada ah gudaheed**.

Qofka cabanaya wuxuu haysataa **10 maalmood oo isku xiga** laga bilaabo helitaanka\* si uu uga jawaabo macluumaad kasta oo dheeraad ah oo ay jeclaan lahaayeen in baaraha u tixgeliyo qayb ka mid ah baaritaanka. \*Marka laga reebo haddii ay OSPI siiso muddo intaas ka badan.

Baaraha wuxuu Qaybta Waxbarashada Gaarka ah ee OSPI siinayaa koobiga jawaabta cabashada **hal maalin oo maalmaha shaqada ah gudaheed**.

Baaraha wuxuu dib u eegayaa dhammaan macluumaadka ay bixiyeen qofka cabanaya iyo Qaybta Waxbarashada Gaarka ah ee OSPI taasoo qayb ka ah baaritaanka.

Haddii loo baahdo, Baaraha ayaa waydiin doona qofka cabanaya ama Qaybta Waxbarashada Gaarka ah ee OSPI inay bixiyaan macluumaad dheeraad ah ama wax caddaynaya.

Inta lagu jiro **50 maalmood gudahooda** laga bilaabo markii ugu horeysay ee ay OSPI heshay cabashada, Baaraha wuxuu qabyo qoraalka go'aanka u gudbinayaa CLCRO si ay u eegaan una ansixiyaan. Sarkaalka Ugu Sareeya ee Waxbarashada (Chief Learning Officer, CLO) wuxuu saxiixayaa go'aanka kama dambaysta ah ansixinta ka dib.

Baaraha wuxuu go'aanka saxiixan iimayl ugu dirayaa qofka cabanaya iyo Qaybta Waxbarashada Gaarka ah ee OSPI ugu dambayn 60 maalmood laga bilaabo taariikhda ay OSPI heshay cabashada. **(Maalinta 60aad)**

